

Waxbarashada diyaarinta ah ee da'da iskuul-horaadka

Xoojinta barashada luqada finnishka ee kooxda iskuul-horaadka



WAXBARASHADA DIYAARINTA AH EE LIX SANO JIRKA WAXAA LOOGU TALAGALAY CARUURTA WAXOOGAA LUQADA FINNISHKA KA TAQAAN.

Cunugu wuxuu si wanaagsan luqada finnishka ugu isticmaali karaa marxadaha ciyaaraha iyo weliba xaaladaha guud ee nolol maalmeedka laakiin wuxuu kaalmo uga baahan yahay arimahan soo socda marka laga hadlayo waxbarashada iskuulka, sida

- maareynta ra'yiga ama fikradaha dhexdooda
- balaarinta ereyada
- xoojinta soo bandhigida hadalkiisa
- garashada ama fahamka hagista
- iyo u diyaarinta iskuulka

BARTILMAAMEEDKA WAXBARASHADAN WAA XOOJINTA AQOONTA LUQADA FINNISHKA EE CUNUGA

Bartilmaameedka waxbarashadan waa xoojinta aqoonta luqada finnishka ee cunuga, si marka dambe wax ku barashada luqada finnishku ugu fududaato. Carruurta waxay baran doonaan sida loogu wada ciyaaro loona wada joogo meel ay dhaqamadu kala duwan yihiin iyadoo la wada siman yahay.

Horumarinta iyo heysashada afka hooyo ee cunugu waa muhiim. U dalbida cunuga barashada afkiisa hooyo waa lagaa caawinayaa. Wadashaqenta guriga iyo iskuulku waa muhiim.

HABKA WAXBARASHADA: CARRUURTA WAXAY KOOXDA ISKUUL-HORAADKA KU WADA JIRAAN CARRUUR LUQADOODU FINNISH TAHAY

Diyaarinta kooxda iskuul-horaadka

- luqada wax lagu baranayo waa finnish
- carruurta waxay kooxda iskuul-horaadka ku wada jiraan carruur luqadoodu ay finnish tahay
- waxaa la xoojinayaa u diyaar noqoshada waxbarashada
- waxbarashadu waxay qaadaneeyso hal sanad dugsiyeed
- luqada finnishka waxaa loo baranayaa qaab ciyaar iyo wax qabad isugu jira
- carruurta waxaa hagaya ka sokoow macalinka/macalimada iskuul-horaadka macalimad/macalin aqoon fiican u leh waxbarida caruurta dhaqamada kala duwan
- cunug kasta waxaa loo sameynayaa barnaamijkiisa waxbarasho iyadoo waalidku goobjoog yahay
- cunugu wuxuu heli karaa in loo codsado xanaano maalmeed dhameystiran (subax iyo galab)
- diyaarinta waxbarashadu waa lacag la'aan.

CODSASHADA DIYAARINTA WAXBARASHADA

Diyaarinta waxbarashada waxaa loo dalbi karaa carruurta ka soo jeeda qoysaska dalkan u soo guuray, kuwa dalkan dib ugu soo laabtay, kuwa ka dhashay qoys laba luqadle ah (kuma jiraan qoysaska finnish-swedishka ah) iyo carruurta la korsaday